WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2024

# AF-SOOMAALI

2024

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

SOM EXAMS

**Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare**

**Xafiiska Imtixaanaadka iyo Shahaadooyinka Qaranka**

**Imtixaanka Fasalka 4aad ee Dugsiga Sare**

**JUUNYO 2024**

# MAADDADA: AF SOOMAALI

**WAQTI: 2 SAACADOOD**

**FADLAN JAWAABAHA KU QOR BUUGGA JAWAABAHA:**

## QEYBTA 1AAD: Sheeko (Fahanka akhriska) (20 dhibcood)

**Akhri Sheekada soo socota ka dibna ka warceli weydiimaha soo socda:**

Aadanuhu waa noole koox koox u nool oo aan kala maarmi karin, waxa uu u nool yahay hadba sida uu yahay xiriirka ka dhexeeya koox walba , sida: xiriir dhalyo, qaraabo, , xididnimo ama guur, iyo xiriir diimeed, intaa waxaa dheer in kooxdii dad ahba ay wadaagaan dal ay ku wada nool yihiin , taas oo ka dhigeysa in ay yihiin ummad magac gaar ah leh, sida ummadda Soomaaliyeed, haddaba si aadanuhu u waaro ugana gaashaanto cadowgiisa waxa uu u baahan yahay xeelado ama tabo kala duwan, kuwaas oo noqan kara tabo cilmiyeed, tabo caqliyeed, iyo taba awoodeed.

Nolosha aadanuhu waxa ay ku billaabatay loolan isaga dhexdiisa ah oo ku laran socadka nolosha, mana jirto nolol ka maran loolan kaaga yimaada dhiggaaga, aadanuhu waxa uu ku dagaalaa dheefta iyo dhulka, isaga oo aalaaba isku haya isriixriix joogto ah, si qof walba uu u xigsado dhainaca wanaagsan.

Tabta ugu wanaagsan ee bulshadu ku taagnaan karto waa iskaashi iyo isgarabsi, taas oo keeneysa nolol togan oo taya leh, kuna hagta tubta wacan , kana leexisa nolosha taban oo tasoowga iyo daalku hareeyeen. haddii aadanuhu uusan iskaashan tallaabo qumman ama toosan ma qaadi karo, waxaana jira murtiyo badan oo arrintaas caddeynteeda laga dheehan karo, sida : " far kaliya fool ma dhaqdo" iyo murtida kale oo oranaysa " gacma wada jir bay wax ku gooyaan ". Erayada caanka noqday soomaalida dhexdeeda oo ka hadlaya iskaashiga waxaa ka mid ah: " aqal tiir la'aantiis, kaligii ma taagnee, haddeyd naan is taakulin, tabar yeelan meysaan….". Marka Laga tago murtida soomaaliyeed iskaashigu waa mabda' diini ah oo aad iyo aad ay diinta islaamku u ammantay, Allah waxa uu qur'aankiisa ku yiri: " isu kaashada waxa wanaagsan, oo ha isu kaashan nina dambiga iyo gardarrada. Haddaba si aan u gaarno guul iyo horumar ,aan iskaashanno , oo aan kawada shaqeyno waxa danta dalka , dadka iyo diintu ku jirto,

**Goobo geli xarafka ka horreeya jawaabta saxda ah.**

1. Xiriirka ka dhexeeya wiilka iyo reerka uu gabadha ka qabo waxaa la yiraahdaa:
   b) Xidid. t) Xigaalo. j) wadaaynimo. x) Tolnimo.
2. Erayga " xeelad" waxa uu la mid yahay
   b) Tabar t) tab j) xoog. x) Taag.
3. Erayga "Isgarabsi" waxaa ku macne ah:
   b) iskaashi t) isriixriix. j) is aqoonsi x) Isdhegeysi

SOM EXAMS

4. Tabta ugu wanaagsan ee Bulshadu ku taagnaan karto waa:
   b) Tartan. t) loolan. j) Iskaashi. x) dhaqaale.
5. Erayga " ku laran" macnihiisu waa
   b) u dhow t) wehliya j) la mid ah. x) ka duwan
6. Erayga " qumman" waxaa loola jeedaa
   b) Toosan t) taagan j) dheer x) weyn .
7. Erayga "tubta" waxaa loola jeedaa
   b) war t) wanaag . j) . waddada x) toosnaan
8. Lidka erayga " togan" waa
   b) toosan t) . Taban. J) taam x) toolmoon.
9. Erayga " Tasow" waxa uu la mid yahay
   b) daal t) cabsi j) oon. x) gaajo
10. Sida ku cad sheekada kore, aadanuhu waxa uu ku dagaalaa
   b) dhul iyo diin. t) Dhul iyo dheef. j) isir iyo dhul x) dhul iyo dhaqan .

**Qeybta 2aad: Naxwe**

**B. Ka soo saar weerahan soo socda tilmaameyaasha ku jira: (20 dhibcood)**

1. Geedku waxa uu leeyahay jirid toosan
2. Kani waa buug fiican
3. kani waa wiil toolmoon
4. Qofkii dadaal sameeya ayaa guuleyste noqanaya
5. Waxa aan soo iibsatay shaati qurxoon.
6. Caano dhanaan ah ayaan cabbay .
7. Qof xun ha la saaxiibin.
8. Islaamku waa tubta toosan
9. Waxa uu leeyahay dabeecad wanaagsan
10. waxa aan haystaa qalin duug ah.

**Qeybta 3aad: Suugaan (20 dhibcood)**

Dhammaystir suugaanta soo socota.

1. Kuu sheekeeye, kaa sheekeeye…………………………………………
2. Nin daad qaaday……………………………………………………………
3. Dherigii fara badiyaa waa …………………………………………….
4. ………………………………………………….... dhaxan kaama ceLiyo.
5. Afku waxa uu la xoog yahay magliga ………………………………..
6. Hawo…………………iyo ………………….. way ku hor ordaan.
7. Faa'iido iyo khasaare way ku …………………………… ………….
8. Far kaliya…………………………………………………………………………
9. Kor waayeel waa………………………………………………………….
10. gabow iyo geeri waa ay …………………………………………………

**Qeybta 4aad: Erayo**

**B- Sheeg lidka erayada soo socda (10 dhibcood)**

| | | |
|---|---|---|
| 1 | Hoore | Adke |
| 2 | Hayin | Layli |
| 3 | Abaar | Aaran |
| 4 | Kax | Jiq |
| 5 | Nirig | Qurbac |

**T. Ku hor qor erayada soo socda kuwo macne ah (10 dhibcood)**

1. Geedi — Hayaan
2. Daleel — meel bannan
3. Dhanaq: — dhul kulul
4. Boholyow — Hilow
5. Jarmaado — kallahaad

**Qeybta 5aad: ka warceli weydiimaha soo socda .**

6. Furfur weeraha soo socda , adiga oo ka soo saaraya , falalka ku jira (3 dhibcod)
   - Ku dadaal waxbarashada.
   - Waxa aan soo iibsaday qalin
   - Tuko salaadda mar walba.
7. Soo koob aragtida ay xambaarsan yihiin tuducyada soo socda. (3 dhibcood)

   *Dadka waa ugu weynahay*

   *Guun soo jiraan aahay*

   *Nuux iyo gadaashii*

   *Duufaan ka guurkii*

   *Baddii jiidhay gabiyada*

   *Dhulkii giigsanaan jiray*

   *Meeshuu ku kala go'ay*

   *Gardafooy agteediyo*

   *Wali goobti baan naal.*
8. Miisaan tuducda soo socda, adiga oo sheegaya hoojiska iyo hooriska (2 dhicood)

   *"Run baa fiican, been baa rufucan, raran cadaab baa leh".*
9. Sharax kooban ka bixi suugaanta soo socota (2 dhibcood)

   b) Intii magacu Lumi lahaa, maalku ha lumo. t) Banaankiisa mare maradiisa geed ma qabsato.

**Qeybta 6aad: curis (10 dhibcood)**

1. Ka qor mid ka mid ah mowduucyada soo socda curis ka kooban ugu yaraan 10 sadar.
   - Qiimaha ammaanada.
   - Xaqdhowrka dariska.



SOM EXAMS
• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com